



# Barashada Diimeed ee Gaarka ah – Foomka Ogolaanshaha Waalidka (CFMD145) February 2019

## Macluumaadka loogu talagalay Waalidka

Haya'dda *Education and Training Reform Act 2006* waxay sheegtaa in dugsiyada dowladdu ahaadaan ku aan diini ahayn. Waxa keliya oo laga reebay xeerkaas waa Barashada Diimeed ee Gaarka oo aan qasabka ahayn (SRI).

Bogga 1aad ee foomkan wuxuu macluumaad ka siiyaa waalidiinta wax ku saabsan SRI. Bogga 2aad wuxuu siiyaa waalidiinta fursadda inay muujiyaan inay doonayaan ama aysan doonayn in ilmahoodu ka qaybgalaan SRI.

Haddii aad doonayso in ilmahaagu ka qaybgalo SRI, fadlan soo celi foomkan taariikhda ku qoran Bogga 2aad.

Ogsoonow: SRI haku khaldin waxbarashada diimeed ee guud taas oo lagu siiyo ardayda oo dhan ee manhajka dugsiya waxay siisaa waxbarasho ku saabsan caqiidooyinka adduunka iyo qaababka caqiidada aan diinta lahayn, taas oo ardayda ka caawisa inay fahmaan adduunka hareeraha ah ayna dulqaad iyo ixtiraam u yeeshaan dhaqamada oo dhan.

## Waa maxay Barashada Diimeed ee Gaarka?

SRI “waa waxbarasho ay bixiyaan kaniisadaha iyo kooxaha diimeed ee kale waxayna ku salaysan tahay fikrado caqiido diimeed”. Tan waxaa ka mid ah daraasado qoraal ah, iyo waxbarasho sida loo noolaado ama loo dhaqmo aydoo la raacayo iimaanka caqiidaha gaarka

SRI waa nashaad manhaj dheeraad ah ‘ikhtiyaar’ ah kaas oo siiya waxbarasho caqiido gaar ah, waxaana bixiya kaniisadaha ama kooxaha diimeed ee kale.

Ayadoo la raacayo dabiicada diimeed gaarka ah ee SRI, Wasaaradda Waxbarashada iyo Tababarka ma aqoonsana daraasadda barnaamijka SRI. Waxyaalaha SRI waxaa laga helaa intarneedka iyo bixiyaha SRI kuwaas oo loogu talagalay waalidka si dib loogu eego.

## Kumaa bixiya Barashada Diimeed ee Gaarka?

SRI Waxaa bixiya folanteero diimeed kuwaas oo uu aqoonsaday bixiyaha la aqoonsan yahay si uu u bixiyo waxbarashada SRI. Haddatan, haya'daha la ogol yahay inay aqoonsadaan tababareyaasha waa:

Diinta	Bixiyaha	Websitka Bixiyaha ee macluumaadka dheeraadka	Lambarka taleefanka
Masiixiga	Korus Connect	<a href="https://www.korusconnect.org.au/">https://www.korusconnect.org.au/</a>	1800 063 341
Islamka	Arkan Toledo/Islamic Council of Victoria	<a href="arkan.org.au/">arkan.org.au/</a>	1300 857 797
Yahuuda	United Jewish Education Board	<a href="http://www.ujeb.org.au/">www.ujeb.org.au/</a>	03 9523 6844
Buudaha	Religions for Peace Australia (RfP)	<a href="http://religionsforpeaceaustralia.org.au/">religionsforpeaceaustralia.org.au/</a>	
Masiixiyada			
Ortoodhadiska			
Diin Baha'iga			
Siikha			
Hindiga			

Tababareyaasha folanteeriga ah waxay ku xiran yihiin kaniisadaha ama haya'daha diimeed. Kalintooda maahan tan baraha oo kale. Si loo helo aqoonsi, waa inay tababar ku qaataan mid ka mid ah bixiyeyaasha kor ku qoran, ayna saxiixaan Koodhka Anshaxa Asluubta, taas oo qeexaysa siday ugu dhaqmayaan dugsiya dowladda. Waa shardi aqoonsiga in folanteerigu lahaado Working With Children Check.

## Ka-qaybgalka Barashada Diimeed ee Gaarka

Ardaygu waa inuu ka dhigtaa SRI dugsiya dowladda ugu badnaan 30 daqiiqo asbuuciiba inta lagu jiro waqtiga qadada, ama isla saacaddii ka hor ama isla markiiba ka dib saacadaha dugsiya.

SRI qasab kuma ahan ardayda. Dugsiyadu waxa keliya oo ardayda u ogolaanayaan inay ka qaybgalaan SRI haddii ogolaanshaha waalidka la bixiyo aydoo la deegsanyo foomkan.

Waalidiinta waxaa laga codsaday inay soo buuxiyaan una soo celiyaan foomkan dugsiya haddii ay doonayaan in ilmahoodu ka qaybgalaan SRI.

Ogolaanshahaaga ilmahaaga inuu ka qaybgalo SRI waa barnaamijkan halkan ku qoran oo keliya. Kumana jiro ogolaanshaha guud wuxuuna sax yahay ilaa dhammaadka sannad dugsiyeedka.

**Ilmahaaga waad kala bixi kartaa SRI mar kasta iyo waqti kasta adoo soo ogaysiinaya maamulaha dugsiya.**

**Macluumaad dheeraad ah:** Ministerial Direction 145 iyo qorshaha Department of Education and Training waxaa laga heli karaa

<http://www.education.vic.gov.au/school/principals/spag/curriculum/Pages/sri.aspx>

## Barashada Diimeed ee Gaarka – Foomka Ogolaanshaha Waalidka

Magaca dugsigi:

Taariikhda foomka la soo celinayo: ...../...../.....

Diinta	Bixiyaha La-aqoonsan yahay	Faahfaahinta Baraha	Waqtiga iyo dherarka barnaamijka (tus. Talaadooyinka ka dib dugsigi wixii teeramka 1aad & 2aad ah)	Age group of students invited to participate in the SRI program

Haddii faahfaahinta shaqsiyaadka folanteeriga ah (magacooda iyo bixiyaha sharciyeysan) aan la heli karin waqtiga foomkan la bixiyey, waxaa la siin doonaa waalidiinta kuwaas oo muujiyey inay doonayaan in ilmahooda/carruurtooda ka qaybgalaan SRI ka hor bilowga barnaamijka. Waalidiintu waxay yeeli karaan inay ilmahooda/carruurtooda kala baxaan SRI waqti kasta, ayagoo soo ogaysiiya maamulaha.

Fadlan sax ku dhig

Waxaan xaqiijinayaa inaan aqriyey oo fahmey macluumaadka ku saabsan SRI oo ku yaal Bogga 1aad	Haa <input type="checkbox"/>	
Ma ogoshahay in ilmahaaga/carruurtaada inay ka qaybgalaan barnaamijka SRI ee kor lagu sheegay?	Haa <input type="checkbox"/>	Maya <input type="checkbox"/>

Haddii aad muujisay 'Haa', fadlan sheeg faahfaahinta ilmahaaga/carruurtaada:

Magaca qoyska Ardayga	Magaca kowaad ee Ardayga	Fasalka	Barnaamijyadee SRI ayaa doonaysaa in ilmahaagu ka qaybgalo?

**Waxaan fahamsanahay!** inay jiri karto ujradda, oo uu go'aamiyo bixiyahu (ujradda ugu sarraysa ee la filayo waa: \$      ), si loogu gato qalabka ardaydu ku isticmaalaan SRI, ujradaasna waxaa la qaadayaa isla markii la ogaado in SRI lagu dhigo dugsigi.

 (Fadlan sax ku dhig)

Magaca Waalidka/Ilaaliyaha: .....

Saxiixa: .....

Taariikhda: ...../...../.....